



OGOW XAQUUQDAADA: MAMNUUCIDA MUSLIMIINTA IYO AFRIKAANKA

Hay'adda International Refugee Assistance Project (IRAP), waxay bixisaa caawimaad bilaash ah haga sharciga dadka qaxootiga iyo dadka kale oo soo barakacay. IRAP kama tirsano dowladda Mareykanka ama hay'adda IOM-ta. Tilmaamahan ayaa bixiyo macluumaadka guud ahaneed. Ujeedada ma ahan talo bixinta dhinaca sharciga ku saabsan codsiyada shaqsiyadeed.

Macluumaadkaan waxaa dib loo eegay bisha shanaad sanadka 2020 (may 2020). Shuruudaha way is beddali karaan.

Waa maxay Mamnuucidda Muslimka iyo Afrikaanka?

“Mamnuucidda Muslimiinta iyo Afrikaanka ” waa amarkii Madaxweyne Donald Trump uu kusoo rogay qaar kamid ah dadka Muslimiinta iyo Afrikaanka ah ee kasoo jeeda dalalka Muslimiinta iyo Afrikaanka qaar ka mid ah kuwaasoo laga mamnuucay soo gelitaanka wadanka Mareykanka. Madaxweynaha wuxuu soo saaray mamnuucidan hada jirta taariikhdu markey ahayd bishii Janaayo,31,2020. Marka la eego sida ay muujiyayaan hogaha kusaabsan taariikhda dadka usafra mareykanka, in kabadan boqolkiiba 95% dadka loo diidey iney helaan viso ay mareykanka kutagaan iyadoo laraacayo sharcigan mamnuucida hada jira waxay noqdeen dad kasoo jeeda wadamo muslim ama Afrikaan ubadan.

Yuu saameeyaa sharciga mamnuucidda muslimka iyo Afrikaanka?

Sharciga mamnuucidda muslimka iyo Afrikaanka wuxuu ka mamnuucayaa muwaadiniinta wadamada qaar noocyada qaar ka mid ah fiisooyinka loogu talagaley dadka toos mareykanka udega iyo kuwa sida kumeel gaarka ah ugu safra (Immigrant and non-immigrant visas) . fiisaha nooca loo yaqaano “Immigranta visas” waxay u ogolaanaysaa qofka inuu si joogta ah udego uguna noolaado mareykanka halka fiisaha nooca loo yaqaano “non-immigrant visa” ay keliya u ogolaato inuu qofka si kumeel gaar ah ugu noolaado mareykanka sida inuu booqasho ama waxbarasho utago. Tusaale ahaan waxaa dhici karta in laguugu fuliyo sharciga mamnuucidda muslimka iyo Afrikaanka haddii aad sugeysey inaad mareykanka gasho kadib markii la ogolaadey dacwaddii kuu socotey si aad dib ula midowdo xubno katirsan qoyskaaga oo mareykanka degan, ama aad hesho fiiso kadib markaad kuguuleysato looteriga, ama fiiso shaqo, mid dalxiis ama mid ardeynimaba.

Waxyaabaha sharcigan kabaxsan ee uusan saameyn waxaa kamid ah: sharciga mamnuucidda muslimka iyo Afrikaanka kuma qabanaayo haddii aad rajeynayso inaad mareykanka ku gasho qaxootinimo, ama qaxootiga iyo dadka megan galyo doonka kala maqan ee la isu keeno iyadoo laraacaayo sharciga laisugu dawcooda ee loo yaqaano I-730 petition. Dadka shuruudaha lagusii daayo iyo kuwa megangalya doonka ah, ama dadka haysta labada dhalasho ee kusafraya passportka wadan kamid ah wadamada aanu saameyn sharcigan. Sharcigan kuma saameynaya hadii aad tahay qof si joogta ah udegan mareykanka (sida inaad haysato green kaar) ama aad ku joogto xaalad qaxootinimo ama megan galyo doon ahaan, ama sifo lagaa joojiyey in wadanka xoog lagaaga saaro, ama shuruud hore lagugusii daayey amaba aad kujoogta sharciga qofka ka ilaaliya in jirdil loo geysto haddii wadankiisa lagu celiyo.

Waa maxay noocyada fiisooyinka lagusoo galo wadanka ee lagu mamnuucey sharciga mamnuucidda muslimka iyo Afrikaanka?

Amarkii/baaqii madaxweynaha ee tirsigiisu ahaa 9645 ee dhaqan galey bishii September 24,2017 waxa uu kamamnuucey iney mareykanka soo galaan muwaadiniinta udhaletey wadamada ay kamid yihiin Iiraan, Liibiya, Waqooyiga kuuriya, Soomaaliya, Suuriya iyo Yaman ee kusugan dibadda mareykanka rabana iney usafraan mareykanka islamarkaana haysan fiiso sharci ah oo horey loo siiyey.

| Jinsiyadda | Fiisaha dal kugalka joogtada ah ee lagu mamnuucey sharciga PP 9645 <i>(Immigrant Visa Entries Banned by PP 9645)</i> | Fiisaha dal kugalka kumeel gaarka ah ee lagu mamnuucey sharciga PP 9645 <i>(Non-immigrant Visa Entries Banned by PP 9645)</i> |
|-------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| Iraan | Dhamaan | Dhammaan marka laga reebo fiisooyinka ardayga wax barashada ku soo galo (F&M) iyo fiisooyinka isweydaarsiga booqashooyinka (J). |
| Liibiya | Dhamaan | ganacsiga (B-1), dalxiiska (B-2), iyo ganacsiga/ dalxiiska (B-1 / B-2) fiisooyinkooda |
| Kuuriyada Waqooyi | Dhamaan | Dhamaan |
| Soomaaliya | Dhamaan | Midkoodna/Midna |
| Suuriya | Dhamaan | Dhamaan |
| Yaman | Dhamaan | ganacsiga (B-1), dalxiiska (B-2), iyo ganacsiga/ dalxiiska (B-1 / B-2) fiisooyinkooda |

- Amarka/baaqa madaxweynaha ee tirsigiisu yahay 9645 wuxuu dhaqan galey bishii October,18, 2017 marka la eego waqooyiga kuuriya. Amarku wuxuu sidoo kale hanibaad safar kusoo rogey muwaadiniinta udhaletey wadanka Venezuela.
- Amarka/baaqa madaxweynaha ee tirsigiisu yahay 9983 ee dhaqan galey bishii February,21,2020 wuxuu dib u hoojiyey mamnuucida wadamada aan kor kusoo tahney. Waxaa intaa dheer oo amarkaas noocyada qaar fiisooyinka mareykanka looga mamnuucey dadka udhashey wadamada Eriteriya, Kaaragistan, Miyanmaar (Burma), Nayjeeriya, Suudaan iyo Tanzaaniya ee kusugan dibadda mareykanka rabana iney usafraan mareykanka islamarkaana aan haysan fiiso sharci ah oo horey loo siiyey.

| Jinsiyadda | Fiisaha dal kugalka joogtada ah ee lagu mamnuucey sharciga PP 9645 <i>(Immigrant Visa Entries Banned by PP 9645)</i> | Fiisaha dal kugalka kumeel gaarka ah ee lagu mamnuucey sharciga PP 9645 <i>(Non-immigrant Visa Entries Banned by PP 9645)</i> |
|-------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| Eriteriya | Dhamaan marka laga reebo noocyada qaar fiisooyinka joogtada ah iyadoo lagu saleynaayo gacan siinta dowladda mareykanka | Midkoodna/Midna |
| Kaaragistan | Dhamaan marka laga reebo noocyada | Midkoodna/Midna |

| | | |
|-------------------|------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|-----------------|
| | qaar fiisooyinka joogtada ah iyadoo lagu saleynaayo gacan siinta dowladda mareykanka | |
| Miyanmaar(Burma) | Dhamaan marka laga reebo noocyada qaar fiisooyinka joogtada ah iyadoo lagu saleynaayo gacan siinta dowladda mareykanka | Midkoodna/Midna |
| Naayjeeriya | Dhamaan marka laga reebo noocyada qaar fiisooyinka joogtada ah iyadoo lagu saleynaayo gacan siinta dowladda mareykanka | Midkoodna/Midna |
| Suudaan | Fiisooyinka Looteriga | Midkoodna/Midna |
| Tansaaniya | Fiisooyinka Looteriga | Midkoodna/Midna |

➤ **Ma jirtaa waddo aan ku heli karo fiiso aan ku aado wadanka Mareykanka haddii ay noqoto lagama maarmaan ?**

Waxaad weydiisan kartaa in lagaa dhaafo/cafiyo xayiraada.

Si laguugu ogolaado cafis, waa inaad dowladda Mareykanka tustaa inaad la kulmi kartid "dhibaato aad u adag" hadii aan laguugu ogolaan usafrida wadanka Mareykanka, inaad wax dhibaato/xalis ah u keeni Karin dalka, iyo soo gelitaankaada inuu yahay danta qaranka mareykanka.

Dowladda Mareykanka waxay bixisay tusaalooyin qaar oo ah markay ku haboon tahay in laga dhaafi karo qofka xanibaada.

- Waxaad dooneysaa inaad booqato ama aad la noolaato qof xubin qoyskaaga ka mid ah oo ku nool wadanka Mareykanka oo aan laguugu oggoleen in aad aado, taasina ay dhaawac ay ugu sugan tahay qofkaas ku nool wadanka Mareykanka;
- Horey waxaad ku nooleyd wadanka Mareykanka ilaa iyo mudo dheer si aad wax u barato ama uga shaqeysato, ama howlo kale, waxaad dooneysaa inaad mar labaad soo aado wadanka Mareykanka isla sababo kale, marka haddii lagu diidona ay dhibaato uga sugan tahay howshaas ama waxqabadkasa;
- Waxad dooneysaa inaad aado wadanka Mareykanka, aad u aado howl ganacsi oo muhiim ah, waajibaadka xirfadaha, kadib haddii aad aadi weyso dhibaato ayay u tahay xirfafahaas iyo ganacsigaas.
- Adigu waxaa tahay cunug yar, ama qof lasoo korsaday;
- Waxad u baahan tahay daryeelka caafimaad ka oo deg-dega ah;
- Waxaa u shaqeysay dawladda Mareykanka, kadib dowladda aya ku cadaysay inaad tahay qof aaminaad ah oo shaqo qiimo leh u qabtay dowladda.
- Waxaad tahay qof haysto sharciga degnaashaha wadanka Kanada, oo ka dalbaday fiiso meel ka mid ah gudaha wadanka Kanada;
- Waxad u safraysaa ulajeedooyin oo la xiriiira dowladda Mareykanka ama arrimo ku saabsan ururka caalami ah.

Ma haystaa wax aan ka walwalo haddii aanan ahayn qof waddani aanan ka mid aheen waddammada la mamnuucay ama aanan rabin inaan ku galo noocyada fiisooyinka laga mamnuucay in lagu soo galo?

Waa inaad ogaataa in xitaa haddii aan lamamnuucin soo gelitaankaaga fiisahaaga ayaa laga yaabaa inuu qaato muddo dheer oo ka duwan sidii horey u ahaan jiray. Xanibaada waxaa u dheer, amarka/baaqa madaxweynaha wuxuu ku soo rogay baaritaan dheeri ah iyo kala shaandheyn lagu samaynayo dadka ka kasoo jeedo wadamada Iraq iyo Somalia oo rabo inay ku soo galaan fiisaha ku meel gaarka ah, iyo dadka Iranian-ta ah doonaya inay ku safraan F, M, iyo fiisayaasha J.

Sidoo kale waa inaad ogaataa xuquuqda aad ku leedahay garoonka diyaaradaha markaad timaado Mareykanka iyadoo dowladda Mareykanka ay sheeganeysa inay xaq u leedahay inay su'aalo dheeraad ah kugu weydiin karaan xaduudka isla markaana ay baaraan alaabtaada. Dib u eeg dukumeentiga hay'adda IRAP ee kahadlaya sharciga Imaatinka garoonka Diyaaradaha ka hor inta aadan safrin.